

Soo Jeedinta Lr. 3

Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.

Canshuurta Baska Dugsiga

Guddiga Agaasimeyaasha ayaa ansixiyay Qaraarka Lr. 1250 oo oggolaanaya canshuur loogu talagalay basaska dugsiga. Canshuurtaan waxay maalgelinaysaa basaska dugsiyada cusub iyo kuwo beddel ah iyo kaabayaasha dallacaadda korontada waxayna oggolaanaysaa canshuurta dheeraadka ah ee soo socota ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada:

Sannadka Ururinta	Qiyaas Ahaan Heerka Canshuurta/\$1,000 Qiimaha la qiimeeyay	Caddadka Canshuurta
2027	\$0.03	\$2,000,000

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 1250. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

Haa
Maya

Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(a))

Bayaanka lagu taageerayo

Kelly Munn, Wright Noel, Neel Dalela
<https://visvote.org/>

Anigoo ah arday fasalka tobanaad oo mid ka mid ah dugsiyada sare ee Degmada, waxaan ogahay sida ay muhiim u tahay in ardayda ay helaan gaadiid ammaan ah oo la isku halayn karo. Canshuurta Gaadiidka waa canshuur hal sanno oo xaddidan oo lagama maarmaan u ah joogtaynta kolonyada basaska ee Degmada. ISD waxay leedahay in ka badan 170 bas. Lacagaha canshuurtaan, oo lagu daro lacagaha iyo deeqaha hadda jirta waxay beddeli doonaan basaska naaftada ah ee duugga ah iyo waxayna oggolaanayaan iibsashada basaska korontada marka ay suurtagal tahay. Maalgelintaan waxay hubisaa gaadiid ammaan ah oo la isku halayn karo oo hufan iyo kolonyada basaska ku soo daraya basas deegaanka u fiican, tallaabo muhiim ah oo lagu gaaro yoolalka joogtaynta iyo yaraynta kharashka shidaalka iyo dayactirka mustaqbalka dheer. Tani waa maalgashi caqli gal ah oo dhaqaale ahaan xaqiijisa hawlgallo ammaan ah oo la isku halayn karo iyadoo la beddelaayo gaadiidkeena xagga mustaqbal joogteeya oo waxtar leh.

Maadaama ay tahay canshuur dib-u-cusbooneysiin ah, ma kordhin doonto canshuuraha. Saddexda canshuur waxaa taageeraya hoggaamiyeyaal kala duwan oo ka socda bulshada, ganacsiga, iyo dowladda: <https://visvote.org/endorsements-for-the-february-2026-renewal-leaves/>.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Lacagta waxaa loo isticmaali doonaa baahiyo si cad loo aqoonsaday. Lacag ayaa loo baahan yahay qalabada hal-qof-hal-qalab iyo waxbarashada Al. Basaska waa in la beddela. Degmadu waa mid wax ku ool ah isla markaana si mas'uul ah u maareeyo dhaqaalaha. Marka la eego hadallada ka soo horjeedidda, waxay u muuqataa in arrimuhu aysan ku saabsanayn kharashka degmada, balse ay ku saabsan yihiin xanaaq la xiriiro dugsiga sare ee cusub. Canshuurahaan wax xiriir ah kuma laha dugsiga sare ee cusub. Eeg sidoo kale jawaabaha 1 iyo 2. Haa ugu Codee canshuuraha!

Bayaanka Sharaxaadda

Ansixinta Soo Jeedinta Lr. 3 waxay oggolaanaysaa soo rogidda canshuuraha hantida oo ah \$2,000,000 ee gudaha Degmada Dugsiga Issaquah oo la ururinayo sannadka 2027. Sida ku cad Qaraarka Lr. 1250 ee ansixinaaya soo jeedintaan, canshuurahaan waxaa lagu shubi doonaa Sanduuqa Gaadiidka Gaariga ee Degmada Dugsiga Issaquah si loo bixiyo qayb ka mid ah kharashaadka iibsashada basaska dugsiga oo cusub iyo kaabayaasha dallacaadda korontada iyo oggolaanshaha in la joojiyo isticmaalka basaska gaboobay ee Degmada ee uu kharash badan ku kaco hawlgelintooda. Haddii codbixiyeyaashu ansixiyaan, canshuuraha hantida sidoo kale ah waxaa lagu ururin doonaa heer lagu qiyaasay \$0.03 halkii \$1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay sannadka 2027. Qiimaha saxda ah ee canshuurta ayaa la hagaajin doonaa iyadoo lagu salaynaayo qiimeynta dhabta ah ee la qiimeeyay ee hantida gudaha Degmada wakhtiga canshuurta.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:

Martin Turney
Madaxa Maaliyadda
iyo Hawlgallada
(425) 837-7011
turneym@issaquah.wednet.edu

Ka dhaafitaanka canshuuraha ayaa laga yaabaa inay heli karaan qaar ka mid ah mulkiileyaasha guryaha. Si aad u ogaato in aad u qalanto ka wac Qiimeeyaha Degmada King lambarka (206) 296-7300.

Bayaanka looga soo horjeedo

Michele Williams
ccare98027@gmail.com

Dhammaanteen waxaan taageerna codsiyada maalgelinta loo baahan yahay si loo ilaaliyo ammaanka iyo wanaagga ardayda Issaquah. Canshuurta Basaska Dugsiga ayaa bixin doonta gaadiid ammaan leh oo la isku halayn karo haddii canshuurtaas runtii loo baahan yahay si loo taageero gaadiidka. ISD waxay mar walba u codsan jirtay lacag hal shay ka dibna u isticmaali jirtay mid kale. Waxaan taageeri doonaa codsiyada maalgelinta loo baahan yahay marka ISD ay muujiso inay ballanqaadkooda xaqiijiyaan ka hor inta aysan weydiisan lacag canshuur dheeraad ah.

Degmada dugsiga ayaa sii wada lacag weydiisashada. Laakiin sanduuqa gaadiidka ayaa sii kordhaaya. Sida laga arko Miisaaniyadda Maarso ee 2025, waxay gaartay \$8.5 milyan. Dalbashada \$2 milyan oo dheeraad ah hadda waa mas'uuliyad darro.

Ku codee maya ee ku aaddan Soo Jeedinta 3.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Maxay ISD hadda u dalbanaysaa lacag dheeraad ah iyada oo ay hayso lacag badan oo ku keydsan bangiga? Warbixinta Maaliyadeed ee Bisha 10-2025 ee - Sanduuqa Gaadiidka, waxay muujinaysaa lacagta dheelitirka bilowga oo ah \$11.2 milyan iyo miisaaniyad dhan \$4.8 milyan. Sidaas darteed, xitaa haddii ay kharash gareyaan dhammaan miisaaniyaddooda, waxaa weli haraya \$6.4 milyan. In hadda la codsado lacag dheeraad ah waxay u egtahay mid aan daacad ahayn ugu yaraan. Maxaa loo tixgelin waayay dhimmista canshuurta halkii laga oran lahaa "koror canshuureed ma jiro," iyadoo canshuur-bixiyeyaal badan ay durba la tacaalayaan culays dhaqaale? *Ku codee Maya!*

Degmada King Buug-yaraha Rasmiga ah ee Codbixiyeyaasha Deegaanka

sida ay codsatay Degmada Dugsiga Issaquah Lr. 411

Isku qor si aad u hesho digniimaha warqadda codbixinta!

Hel qoraallo taleefan ama iimeelyo ah marka warqaddaada codbixinta la sii habeynaayo oo la tiriyo. Iska qor barta kce.wiki/TrackMyBallot-SO.



Is diiwaan geli si aad u codeyso



Oonleenka: Booqo VoteWA.gov si aad oonleenka iskaga diiwaan geliso oo aad u codeyso. Wakhtiga kama dambeysta ah ee is diiwaan gelinta oonleenka ee Doorashada Gaarka ah ee Febraayo waa Febraayo 2.



Boostada: Ka soo degso oo daabaco foomka diiwaan gelinta barta kce.wiki/VoterReg oo boostada ugu dir Doorashooyinka Degmada King: **919 SW Grady Way, Renton, WA 98057**. Waa in la helaa ugu dambeyn Febraayo 2.



Shakhsi ahaan: Waxaad shakhsi ahaan iskaga diiwaan gelin kartaa xarunta guud ee Doorashooyinka Degmada King ilaa iyo Febraayo 10, Maalinta Doorashada. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan saacadaha iyo adeegyada waxaad ka heli kartaa barta kingcounty.gov/elections.

Nala soo xiriir si aad u hesho buug-yarahaan oo qaab kale ah.

Contact us to receive your voting materials in Chinese, Korean, Russian, Somali, Spanish, or Vietnamese.

如需獲取您的中文投票資訊，請與我們聯絡。

한국어로 투표 자료를 받으시려면 저희에게 연락하세요.

Свяжитесь с нами, чтобы получить материалы для голосования на русском.


Nala soo xiriir si aad u hesho agabyadaada codeynta oo ku qoran Af-Soomaali.

Comuníquese con nosotros para recibir sus materiales de votación en español.

Xin vui lòng liên lạc với Sở Bầu cử Quận King để nhận tài liệu bầu cử bằng tiếng Việt.



Baro wax dheeraad ah oo ku saabsan sanduuqyada lagu rido, Xarumaha Codbixinta, iyo in ka badan!



Waxaan halkaan u joognaa in aan ku caawinno!

Shaqaalaha doorashooyinka ayaa kaa caawinno kara inaad is diiwaan geliso oo aad hesho warqad codbixin cusub ilaa iyo Maalinta Doorashada. Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah oo ma doonaysaa inaad si gaar ah u calaamadayso warqaddaada codbixinta? Ka hel warqaddaada codbixinta oonleenka barta kingcounty.gov/elections/obmp si aad uga faa'iidayso Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka.

Warqaddaada codbixinta ayaa waxaa ku duuban macluumaad waxtar leh! Iska xaqiiji inaad lifaaqa warqaddaada codbixinta ka dhex eegto:

- shanta sanduuq ee lagu rido warqadda codbixinta ee kuugu dhow,
- halka aad ka heli karto caawinnaad shakhsi ahaaneed,
- sida loo daabacdo warqaddaada codbixinta haddii taada kaa lunto ama waxyeello soo gaarto,
- sida loo soo celiyo warqaddaada codbixinta,
- iyo in ka badan!

Yaa deeq ku bixiya oleyaasha?
Eeg ku-deeqeyaasha dhaqaale ee musharaxiinta iyo cabbirrada sharciga ee gobolka iyo dowladda hoose: Guddiga Kashifaadda Dadweynaha
www.pdc.wa.gov
Wicitaanka Lacag La'aanta 1-877-601-2828

206-296-VOTE (8683)
elections@kingcounty.gov
kingcounty.gov/elections
Baraheena Bulshada @kcelections



Degmada Dugsiga Issaquah Lr. 411

Soo Jeedinta Lr. 1	<i>Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.</i>		
Canshuurta Beddelaadda ee Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada			
Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Issaquah ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 1248 ee khuseeya soo jeedin si loo taageero barnaamijyada dugsiga iyo hawlgallada maalinlaha ah. Soo Jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay soo rogto canshuuraha dheeraadka ah ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada si loo joogteeyo barnaamijyada waxbarashada loona taageero barnaamijka Sanduuqa Guud ee Degmada, hawlaha maalinlaha ah, waxbaridda, agabyada fasalka, hawlaha ka baxsan manhajka, iyo gaadiidka:			
Sannadka Ururinta	Qiyaas Ahaan Heerka Canshuurta/\$1,000 Qiimaha la qiimeeyay	Caddadka Canshuurta	
2027	\$1.25	\$75,200,000	
2028	\$1.24	\$78,200,000	
2029	\$1.22	\$81,000,000	
2030	\$1.19	\$82,800,000	
sida ku cad Qaraarka Lr. 1248 iyadoo la raacayo xaddidaadaha sharciga ee ku aaddan caddadka iyo heerarka canshuurta wakhtiga canshuurta la soo rogayo. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?			
Haa			
Maya	Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(a))		

Bayaanka lagu taageerayo

Kelly Munn, Wright Noel, Neel Dalela https://visvote.org/

Waxaan ahay arday fasalka tobonaad ee dugsi sare ee Degmada, waxaanan ka qayb qaatay Guddiga Canshuurta ee ansixiyay curaartan. Anigoo ku hadlaya magaca ardayda Degmada Dugsiga Issaquah ("ISD"), waxaan idinka codsanayaa inaad haa ugu codeysaan Canshuurta Barnaamijyada Waxbarashada iyo Hawlgallada.

Maalgelinta uu gobolka bixiyo ma buuxiso maalgelinta dugsiyada bulshada u baahan yihiin. Canshuurtaan waa muhiim si loo daboolo farqiga u dhexeeya maalgelinta gobolka iyo waxbarashada tayada leh ee qeexaysa ISD iyo bulshadeenna. Canshuurtaan waxay maalgelisa 16.6% miisaaniyadda hawlaha ISD. Markii guddiga canshuurta (oo ka kooban arday, deganeyaasha, macallimiin, iyo maamuleyaa) ay eegeen barnaamijyada loo baahan yahay, waxaan taageernay canshuurtaas si loo bixiyo barnaamijyadaas. Maalgelintu waxay bixin doontaa koorsooyin yaryar, agab tababar khaas ah, la-taliyeyaal, kalkaaliyeyaasha caafimaadka, iyo ballaarin taageerada daryeelka ardayda. Haddii canshuurta ay fashilanto, waxaa jiri doona jarista barnaamijyada, macallimiinta iyo shaqaalaha taasoo saameyn ku yeelan doonta barashada, guusha iyo kheyraadka muhiimka ah. Canshuurtaan waa maalgelin ilaalinaysa oo kor u qaadaysa qiimaha bulshada iyo hantida.

Maadaama tani tahay canshuur beddel ah, ma kordhin doonto heerka canshuurtaada. Dhammaan saddexda canshuur waxaa taageera Senatarka Victoria Hunt, iyo Wakiillada Lisa Callan iyo Zach Hall.

Ku Codee Haa!

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Bayaannada ka soo horjeedidda waxay soo qaadaan arrimo hore loo xalliyay, mana caddeeyaan sida dugsiyada loo maalgelin doono haddii canshuuruhu wakhtigooda dhammaadaan. Arrimaha ay bayaannada ka soo horjeedidda soo bandhigeen waxay dhaceen sannado ka hor, horreyna waa loo xalliyay. Degmadu: (1) waxay shaqaaleysiisay kormeere guud oo cusub; (2) waxaa la doortay guddi dugsiyeed cusub; (3) waxa la dhisay Guddiga Kormeerka Mashaariicda Hantida Waaweyn oo ay xubno ka yihiin muwaadiniin, si loo kormeero loona hubiyo in dhammaan lacagaha canshuuraha si habboon loo isticmaalo. Eeg sidoo kale jawaabta Soo Jeedinta 2.

Doorashooyinka Degmada King looma oggola inay wax ka beddelaan bayaannada, mana qaadaan mas'uuliyadda qoraallada ku jira.

Bayaanka Sharaxaadda

Ansixinta Soo Jeedinta Lr. 1 waxay beddeli doontaa canshuur wakhtigeeda dhammaanayso waxayna oggolaanaysaa in lasoo rogo canshuuro hanti oo dhan \$75,200,000 ee gudaha Degmada Dugsiga Issaquah oo la ururinayo sannadka 2027, canshuur ah \$78,200,000 oo la ururinayo sannadka 2028, canshuur ah \$81,000,000 oo la ururinayo sannadka 2029, iyo canshuur ah \$82,800,000 oo la ururinayo sannadka 2030. Sida waafaqsan Qaraarkan #1248 ee ansixinaaya soo jeedintaan, canshuurahaan waxay bixinayaan qayb ka mid ah kharashaadka guud ee maamulka Degmada ee aysan si buuxda u maalgelinin gobolka. Kharashaadka guud ee Degmada waxaa ka mid ah kharashaadka shaqaalaha (sida mushaharka), agabka waxbarashada, barnaamijyo gaar ah, nashaadaad iyo isboortis, hawlgalka nidaamyada teknoolajiyada, kharashaadka gaadiidka, dayactirka xarumaha iyo kharashaadka kale ee aanan ahayn hantida waaweeyn ee maamulidda dugsiyada Degmada. Haddii ay codbixiyeayaashu oggolaadaan, iyadoo lagu saleynayo macluumaadka qiimeynta la qiyaasay, heerarka canshuurta la qiyaasay ee \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay waxay noqon doonaan \$1.25 (ururinta 2027), \$1.24 (ururinta 2028), \$1.22 (ururinta 2029), iyo \$1.19 (ururinta 2030). Ururinta saxda ah ee canshuurta waxay ku xiran tahay xadka sharciga ee waqtiga canshuurta iyo heerka waa la habayn doonaa iyadoo lagu saleynayo qadarka dhabta ah ee la shaadeeyay iyo qiimaha la qiimeeyay ee hantida gudaha Degmada wakhtiga la qaadayo canshuurta.

Ka dhaaftaanka canshuuraha ayaa laga yaabaa inay heli karaan qaar ka mid ah mulkiileyaasha guryaha. Si aad u ogaato in aad u qalanto ka wac Qiimeeyaha Degmada King lambarka (206) 296-7300.

Bayaanka looga soo horjeedo

Michele Williams ccare98027@gmail.com

Dhammaanteen waxaan taageereynaa maalgelinta saxda ah ee dugsiyada iyo ardayda ISD. Nasiib darro, mas'uuliyiinta maamulka ee ISD waxay leeyihiin taariikh ay ku codsadaan lacag hal ujeeddo ah, balse ay markaas lacagta canshuur-bixiyeyaasha u adeegsadaan wax gebi ahaanba ka duwan.

Sannadkii 2022, Canshuur ayaa la ansixiyay oo ay ku jirtay taageero caafimaadka maskaxda ee ardayda (sida tan hadda jirta). Si kastaba ha ahaatee, wax yar kadib markii la ansixiyay, *maalgelinta barnaamijkaas waa la joojiyay si “miisaaniyadda loo dheeltiro”*.

Waxaan taageeri doonaa codsiyada maalgelinta ku habboon *marka* Degmada Dugsiga Issaquah ay muujiso inay u isticmaali doonto lacagta waxyaalaha loo ballan qaaday. ISD waxay u baahan tahay inay caddeyso inay ballanqaadkooda fuliyaan ka hor inta aysan weydiisan lacag canshuur dheeraad ah. *Ku Codee Maya* Soo Jeedinta 1.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Waxaan qadarinaynaa ardaygan waxaana jeclaan lahayn inay iyaga mas'uul ka noqdaan miisaaniyadda ISD. Nasiib darro, hawl wadeennada xilka haya ayaa marar badan ballanqaaday inay lacagaha u adeegsan doonaan ujeeddoyin gaar ah, balse markii dambe ku kharash gareeyay wax kale. Gaar ahaan, lacagaha loogu talagalay “Wanaagga ardayga” ee ka yimid canshuurtii 2022, sida ku xusan bayaankeenna ka soo horjeedidda. Ilaa ay muujiyaan mas'uuliyad maaliyadeed oo dhab ah isla markaana ay si run ah u kasbadaan kalsoonida codbixiyeyaasha, waa inaan ku *Codeynaa Maya*.

Degmada Dugsiga Issaquah Lr. 411

Soo Jeedinta Lr. 2	<i>Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.</i>		
Canshuurta Beddelaadda ee Mashaariicda Hantida Waaweyn (Teknolojiyada iyo Dayactirka Muhiimka ah)			
Guddiga Agaasimeyaasha ayaa ansixiyay Qaraarka Lr. 1249 oo oggolaanaya canshuur loogu talagalay teknolojiyada/casriyaynta. Canshuurtaan waxay maalgelinaysaa dayactirka muhiimka ah ee xarunta, horumarinnada, iyo beddelaadyada; horumarinnada teknolojiyada, qalabka, shaqaaleysiinta, iyo horumarinta xirfadeed si loo taageero loona mideeyo nidaamyada iyo adeegyada teknolojiyada ee degmada oo dhan iyo cusbooneysiinta ku aaddan ammaanka, amniga iyo hufnaanta, waxayna oggolaanaysaa canshuurta dheeraadka ah ee soo socota ee dhammaan hantida canshuuri karo ee gudaha Degmada:			
Sannadka Ururinta	Qiyaas Ahaan Heerka Canshuurta/\$1,000 Qiimaha la qiimeeyay	Caddadka Canshuurta	
2027	\$0.65	\$39,169,000	
2028	\$0.60	\$37,806,000	
2029	\$0.59	\$39,341,000	
2030	\$0.59	\$41,194,000	
dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 1249. Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?			
Haa			
Maya	Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(a))		

Bayaanka lagu taageerayo

Kelly Munn, Wright Noel, Neel Dalela https://visvote.org/

Dib-u-cusbooneysiinta canshuurtaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay sii waddo bixinta teknolojiyada fasalka ee casriga ah, barnaamijyo iyo shabakad ammaan ah, siinaysa ardayda xirfadaha looga baahan yahay guud ahaan dunida maanta. Waxay hubisaa in arday kasta uu heli karo kombuyuutar.

Sidoo kale, guddiga canshuurta, oo aan anigu xubin ka ahaa, ayaa eegay \$140 milyan oo dayactir iyo hagaajin ah oo looga baahan yahay guud ahaan Degmada. Waxaan ku talinay oo mudnaanta siinay \$55.6 milyan dayactir muhiim ah afarta sanno ee soo socda. Canshuurtaan waxay maalgelin doontaa dayactirka saqafka, HVAC, ammaanka iyo amniga, tubooyinka, iyo hagaajinta goobaha. Lacagaha waxaa loo qoondeeyay baahiyaha gaarka ah, iyadoo mudnaanta la siinayo dayactirka ugu muhiimsan. Anigoo arday ka ah dugsiya sare ee Degmada, si shakhsi ah ayaan u garanayaa sida ay muhiim u tahay in arday walba uu helo kombuyuutar, in nidaamyada HVAC ay shaqeeyaan, iyo saqafka inuu roobka ilaaliyo.

Sida canshuur dib-u-cusbooneysiin ah, canshuurtaan ma kordhin doonto heerarka canshuurtaada. Lacagahaan waxaa looga baahan yahay dayactir iyo habeyn muhiim ah. Lacagta ka soo baxda canshuurtaas looma isticmaali doono dugsi sare oo cusub. Guddiga Kormeerka Mashaariicda Hantida Waaweyn ee ay bulshada hoggaaminayso ayaa hubin doona in arrintaan run tahay.

Guddiga PTSA-ga ee Degmada Dugsiga Issaquah oo ay ku jiraan isbahaysi ka kooban PTA-yada deegaanka, ayaa taageeray saddexda canshuur. Ku Codee Haa!

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

Lacagta canshuuraha waa mid lama huraan u ah dugsiyadeena. Canshuurahaan waxay dabooli doonaan in ka badan 16% miisaaniyadda Degmada. Iyadoo aan la helin lacagta canshuuraha macallimiinta iyo shaqaalaha caafimaadka maskaxda waa la cayrin doonaa, dugsiya sare ee toddobada xiisadood waa la joojin doonaa; barnaamijyada laba-luqadeed waa la joojin doonaa; ilaalada, kalkaaliyeyaasha caafimaadka, shaqaalaha nadiifinta waa la cayrin doonaa. Dugsiga hoose ee Challenger waxay leedahay saqaf daadanaya oo u baahan dayactir. Guddiga bulshada ayaa mudnaanta siiyay baahiyaha. Eeg sidoo kale jawaabaha Soo Jeedinta 1 iyo 3.

Doorashooyinka Degmada King looma oggola inay wax ka beddelaan bayaannada, mana qaadaan mas'uuliyadda qoraallada ku jira.

Bayaanka Sharaxaadda

Ansixinta Soo Jeedinta Lr. 2 waxay oggolaanaysaa soo rogidda canshuuraha hantida oo ah \$39,169,000 ee gudaha Degmada Dugsiga Issaquah Lr. 411 oo la ururinayo sannadka 2027, canshuur ah \$37,806,000 oo la ururinayo sannadka 2028, canshuur ah \$39,341,000 oo la ururinayo sannadka 2029, iyo canshuur ah \$41,194,000 oo la ururinayo sannadka 2030, si loo maalgeliyo dayactirka xarunta muhiimka ah, hagaajinnada, iyo beddellada; teknolojiyada, ee ku aaddan horumarinnada teknolojiyada, qalabka, shaqaalaha, iyo horumarinta xirfadeed ee taageeraya nidaamyada iyo adeegyada teknolojiyada ee degmada oo dhan iyo si teknolojiyada loogu daro waxbarashada iyo barashada; iyo cusbooneysiinta ammaanka, amniga iyo hufnaanta. Sida waafaqsan Qaraarka Lr. 1249 ee ansixinaya soo jeedinta, canshuurahan waxaa la ururinayaa sanadaha dugsiyada 2026-2027 ilaa 2030-2031, oo dhan, waxaana lagu shubayaa Sanduuqa Mashaariicda Hantida Waaweeyn ee Degmada si ay horumarinnada ugu daboolaan barnaamijyada hadda iyo mustaqbalka ee waxbarashada ardayda degmada. Haddii ay codbixiyeayaashu oggolaadaan, iyadoo lagu saleynayo macluumaadka qiimeynta la qiyaasay, heerarka canshuurta la qiyaasay ee \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay waxay noqon doonaan \$0.65 (ururinta 2027), \$0.60 (ururinta 2028), \$0.59 (ururinta 2029), iyo \$0.59 (ururinta 2030). Qiimaha saxda ah ee canshuurta ayaa la hagaajin doonaa iyadoo lagu salaynaayo qiimeynta dhabta ah ee la qiimeeyay ee hantida gudaha Degmada wakhtiga canshuurta.

Ka dhaaftaanka canshuuraha ayaa laga yaabaa inay heli karaan qaar ka mid ah mulkiileyaasha guryaha. Si aad u ogaato in aad u qalanto ka wac Qiimeeyaha Degmada King lambarka (206) 296-7300.

Bayaanka looga soo horjeedo

Michele Williams ccare98027@gmail.com

Dhammaanteen waxaan taageernaa maalgelinta *saxda ah* oo loogu talagalay dugsiyada iyo ardayda ISD. Nasiib darro, mas'uuliyiinta ISD waxay leeyihiin taariikh ah inay lacag u dalbadaan hal shay ka dibna u isticmaalaan lacagta canshuur-bixiyeyaasha si ay u maalgeliyaan wax aad uga duwan. Taasi waa sababka hantidhawro badan oo Gobolka ah ay u sheegeen ciladaha ISD iyo kharashaad si khaldan loogu isticmaalay Curaarta 2012 iyo 2016.

Maamuleyaasha ISD sidoo kale waxay rabaan inay lacagtaada ku bixiyaan mashaariic dhismo oo qaali ah marka xulashooyin dhaqaale ahaan mas'uul ah la heli karo. Maxaa canshuuraheena loogu isticmaalaa dhisidda Dugsiga Sare ee 4-aad oo Dhammaystiran, marka ay saadaalinayaan *Hoos u Dhaca Ugu Weyn ee Diwaan Gelinta ee Hal Sanno Tan iyo Cudurkii Faafaha* ee kulankoodii Oktoobar? Waxaan taageeri doonaa codsiyo maalgelin *ku habboon* – laakiin ma aha codsiyada khasaaraha leh.

Maxay ISD noo siisay soo jeedin qaali ah oo aan si fiican ugu adeegin ardayda iyo qoysaska deegaanka? Gaar ahaan hadda, iyadoo dad badan oo deganeyaasha ka mid ah ay dhibaato dhaqaale la tacaalayaan. Qaar ay waayeen shaqadooda, qiimaha cuntada iyo shidaalkana sareeyo. *Fadlan ku Codee Maya* oo u sheeg ISD inay muujiyaan mas'uuliyadda dhaqaale!

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Ardayda ISD waxay mudan yihiin teknolojiyad casri ah iyo dayactir habboon. Si kastaba ha ahaatee, ISD waxay ku adkaysanaysaa isticmaalka lacagta canshuur-bixiyeyaasha mashaariic dhisme oo qaali ah oo aan loo baahnayn. Tusaale ahaan, Dugsi Sare 4-aad, iyadoo sida lagu sheegay warbixinta Seattle Times ee 16-ka Diseembar, *“Inta u dhexeysa 2023 iyo 2041, Washington waxaa la filayaa inay aragto hoos u dhac 8% ah oo ku aaddan tirada ardayda ka qalin-jebisa dugsiya sare.”* Ku khasba inay lacagtaada u adeegsadaan waxa runtii caawinnaya ardaydeenna -- *Ku Codee Maya Soo Jeedinta 2.*

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:

Martin Turney
Madaxa Maaliyadda iyo Hawlgallada (425) 837-7011
turneym@issaquah.wednet.edu